



Ka Qeybqaadashada Ardayda ee Maalinta Tallaabada Wax Lagaga Qabanayo “Badbaadinta Cimilada Mustaqbalka” ee 15ka Maarso

Gacaliye Bulshada PPS,

Sida aad ka warqabtaa, waxaa jira kacdoon caalamiya oo ay hoggaaminayaan ardaydu oo loo asteeyey maalinta Jimcaha ah, bishan Maarso 15keeda, taasi oo dhammaan ardayda dunida oo dhami ay ku muujineyaan aragtidooda ku wajahan isbedalka cimilada. Waxaan ognahay in qaar ka mid ah ardayda magalaadeena Portland ay sameynayaa tixgalin ah in ay ka baxaan iskuulada saacadu marka ay tahay 11:00 subaxnimo, si ay u tagaan bannaanbaxaasi ka dhacaya Hoolka Guriga looga taliyo Magaalada Portland.

Maadaama aynu aqoonsanahay in ay ardaydu xaq u leeyihiin inay kulmi karaan, sidoo kalena ay sameyn karaan bannaanbax ay dareenkooda iyo waxyaabaha ay aaminsan ku taageerayaan, haddana ujeedadeena ugu weyn ee aynu diirada saareynaa haddii aanu nahay macalimiintii/maamulku waxa ay tahay in aanu xaqiijino inay ardaydayadu wax baranayaan iyada oo aan yaraneyno in uu hakad ku yimaado fasaladooda waxbarashada. Waxa aanu rajeyneynaa in ay ardaydayadu ay fasaladooda joogaan iyaga oo nabadqaba si ay u sii wataan waxbarashada fasaladooda ka socota.

Waalidiin ahaa waxaanu idinku dhiirigelineynaa inaad ardeydiina kala sheekeystaan idinka oo fahamsan hawsha ay kaga qeybqaadanayaan qaar ka mid ah ardayda ee ay kaga baxayaan dhismaha iskuulka. Qof kastaa waa in uu ogyahay haddii ay ardaydu doortaan in ay ka baxaan dhismaha iskuulka maalintaas in loo qaadanayo inuu ka maqan yahay iskuulka iyo iyada oo dugsiyada degmadu ayna xaqiijin karin nabadgelyadooda haddii ay ardaydu bannaanka uga baxaan dhismaha iskuuladooda. Fadlan waxaad ogaataa in maamulka Dugsiyada Dadweynaha Portland inay intii awoodooda ah ay isha ku hayn doonaan hawlaha ardayda, laakiin in ay adag tahay inay si wax ku ool ah u kormeeraan arday kasta oo isagu doorta inuu ka baxo dhismaha iskuulka isaga oo ka qeybgalaya munaasabad ayna soo qabanqaabin masuuliyiinta Iskuulkiisu.

Waxa aanu ku dhiirigelineynaa ardayda in ay muujiyaan aragtidooda iyaga oo ku cabirayao wada-hadal, cilmi-baaris, ololayn, qoraalo ay ku taageerayaan iyo ka qeybqaadashada bannaanbaxyada dhaca maalmaha iskuulku xiran yahay. Waxa aan sidoo kale macalimiinta ku dhiirigelineynaa in ay u fudeydiyaan ardayda wixii wada-hadal lagaga doodayo inta waxbarashada fasalku socoto, gaar ahaan marka ay la xiriirto waxbarashadooda caadiga ah ee ku sidkan sayniska iyo barashada cilmiga bulshada. Waalid ahan haddii ay jiraan macluumaad ku saabsan hawlahaas oo gaar u ah iskuulkaaga waa in uu kula soo socodsiiyaa maamulka iskuulku.

Waxa aan sii wadi doonaan sidii aan wax uga qaban lahayn dhammaan sidii ay iskuuladeenu u noqon lahaayeen kuwa nabadgelyo ah, soo dhaweyn leh, oo gargaara qof kasta. Waxa aan sidoo kale fahamsanahay in ardaydeenu yihiin hoggaamiyaal leh fikirado qoto dheer oo ay kaga fikirayaan mustaqbalkooda iyo kani dumida ku wareegsan

Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina iyo fahamkiinaba,

Guadalupe Guerrero

Guddoomiyaha Waxbarashada